

## Jelaatiinta ku jirta tallaalka MMR

Jelaatiinta la farsameeyay ee ka timid doofaarka (hydrolysed) waxaa lagu daraa tallaalada qaar ka mid ah sidii dejiye. Noocan jelaatiinta la habeeyay waxaa si wayn loogu beddelaa sifayn iyo habbayn. Tallaalada ka kooban jelaatiinta sidaas awgeed caadi ahaan way aqbali karaan dadka aan cunin hilibka doofaarku.

### **Waa maxay jelaatiintu?**

Jelaatiintu waa isku darka borootiinada samaysma marka kolejiinta ka timid digaaga, lo'ada, doofaarada iyo kalluunka hab kimikaad lagu yaryareeyo. Kolejiinta waxay ku jirtaa seedaha, carjowda, lafaha iyo carjowda adag. Jelaatiinta loo isticmaalo dawooyinka waxa loo warshadeeyaa si waafaqsan shuruucda adag ee sixada iyo badbaadada.

### **Waxa ku saabsan jelaatiinta ku jirta dawooyinka**

Jelaatiinta waxaa loo isticmaalaa dawooyin kala duwan, oo ah qaabka kiniinka, kaabsoosha iyo qayb tallaalada ah. Tallaalka keliya ee ka midka ah Barnaamijka Tallaalada Carruurnimada Noorwayjiyaanka ee ay ku jirto jelaatiintu waa MMRVaxpro. Wixii ah tallaalada aan ku jirin Barnaamijka Tallaalka Carruurnimada – hubi waxa uu ka kooban yahay macluumaadka waxa laga sameeyay.

### **Sababtee loo isticmaalayaa tallaalada jelaatiinta?**

Jelaatiinta Qaab kimikaad loo qurbay waa dejiye ilaaliya waxa uu ka kooban yahay tallaalku muddo wakhti ah (badbaadada iyo waxtarka). Barbar dhig jelaatiinta loo isticmaalo cuntadda, noocan jelaatiinta ah waa la sifeeyay oo waxaa loo kala jebiyay melekuyuulo yaryar oo loo yaqaano bebtaydhis.

### **Waa maxay aragtida caqiidada Muslimiinta ku saabsan tallaalada ka kooban jelaatiinka?**

Sanadii 2001, Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) waxay soo ururisay 100 culimada Islaamka ah si ay ugala hadasho isticmaalka tallaalada jelaatiinka. Taageeradooda, WHO waxay xaqiijisay in noocan jelaatiinka la habbeeyay aad loo sifeeyay oo loo habeeyay markaas waxaa ka lumay ku xidhnaanshaheeda doofaarada oo sidaas awgeed waa ay aqbali karaan Muslimiintu. Macluumaadka waa la heli karaa [www.immunize.org/talking-about-vaccines/porcine.pdf](http://www.immunize.org/talking-about-vaccines/porcine.pdf)

### **Miyuu jiraa tallaalka MMR oo aanay jelaatiintu ku jirin?**

Haddii uu qof doorto inaanu aqbalin MMRvaxpro sababtoo ah waxa jelaatiintu ka kooban tahay, tallaalka MMR (Priorix) waa la heli karaa. Tallaalka jadeecada iyo qanjo bararka kuma jirto jelaatiin. Tallaalku waa bilaash oo waxaa laga dalban karaa machadka Noorweey ee Caafimaadka Dad waynaha.

Machadka Caafimaadka Dad waynaha ee Norweey waxa uu si xoogan ugu talinayaa in carruurta ay qaadato dhammaan tallaalada lagu bixiyo Barnaamijka Tallaalka Carruurnimada si looga hortago jirooyinka halista ah. Tallaalka MMR waxaa loo siiyaa sidii labba tallaalka, ilaa 15 bilood jirka iyo muddada fasalka 6aad (ilaa 11 sanadood).

La xidhiidha kalkaalisadaada caafimaadka dad waynaha haddii aad qabto wax su'aalo ah.